



Ilaha Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta F3

- [Khariiradda Guud](#)
- [Buugga khariidadda ee beddelka soohdinta dugsiga hoose](#)
- [Buugga khariidadda ee beddelka soohdinta dugsiga dhexe](#)
- [Nuxurka Tirakoobka](#)
- [Jaantuska qaabka gudbinta dugsiyada](#)
- [Cabbirka Saameynta Sinaanta Jinsiga](#)

Isbeddelada Barnaamijka Xulashada Diirad-saarista


Laba Luuqad Wax-ku-barshada iyo Goobaha Creative Science School iyo qaababka u gudbinta dugsiyada ee Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta F3 waa sidan soo socota:

- **Creative Science School (CSS) ayaa dib loogu raray Bridger isagoo ah K-8.** Muddada dhow CSS-ta jirta waxay ku biiri doontaa barnaamijka xaafadda Bridger. Qaabeynta diiwaangelinta la saadaaliyay ee 2025-26, waxa la qiyaasayaa in ku dhawaad kala badh dugsiga lagu qori doono bakhtiyaanasiib halka badhka kalena lagu qori doono ardayda ku nool aagga dugsiga. Qeybta bakhtiyaanasiibka waxa loogu talagalay inuu agagaarka ka diiwaangeliyo arday ka badan kuwa meelaha fog, iyadoo lagu qaatay hababka diiwaangelinta ee hadda jira ee Creative Science School. Macquulnimada diiwaangelinta CSS waxa hagaajin kara degmadu si ay u taageerto yoolalka diiwaangelinta CSS iyo dugsiyada u dhow.
- **Isbaanishka DLI ee heerka K-5 wuxuu ku yaalaa Lent (dugsiga oo dhan) iyo Atkinson (goob horay ay iskula yaaaleen) Labaduba waxay u gudbiyaan Kellogg.** Barnaamijka DLI ee hadda jira ee Isbaanishka waxaa ku biiray barnaamijka laba-dhinac laha ee hadda ku yaal Bridger. Lent waxay u baddelmaysaa qaabka waxbarashada Isbaanishka DLI ee dugsiga oo dhan oo leh aagga dugsiga. Ardayda dhigata barnaamijka xaafadda Lent waxaa lagu soo dhaweyn doonaa inay ku biiraan barnaamijka Isbaanish DLI ama waxay isticmaali karaan ikhtiyaarka ah inay doortaan dugsiga xaafadooda u dhow. Barnaamijka DLI ee Isbaanishka ee Atkinson ayaa weli sii ahaanaya sida uu ahaa.
- **Shiinayska DLI ee heerka K-5 wuxuu sii ahaanayaa Clark (oo hore u ahaan jiray Harrison Park) iyo Woodstock, ee goobtooda qaab wadaaga ee horay u jirtay. Labaduba waxay u gudbiyaan Harrison Park.** Barnaamijka Clark waa hal-dhinac, barnaamijka Woodstock-na waa laba-dhinac. Tani waxay keenaysaa qeybsanaanta u gudbinta Woodstock, iyada oo barnaamijka xaafada u gudbinayo Lane.

Isbeddellada U gudbiyaha Barnaamijka Xaafadda

Waxa jira saddex isbeddel oo qaabka u gudbinta dugsiga hoose-ila-dhexe ah oo ku jira Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta F3, kuwaas oo kala ah:

- **Xaafada Atkinson K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Harrison Park.** Tani waa si kor loogu qaado diiwaangelinta Harrison Park. Xulashadani waxay keeni doontaa kala qeybsanaata u gudbinta Atkinson ee u dhaxeysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka Isbaanishka DLI, maadaama barnaamijka Isbaanishka DLI uu u gudbin doono Kellogg. Atkinson waxa uu ku ag yaalaa Franklin High School, markaa waxa laga yaabaa in ay u kala qeybsamaan dugsiyada dhexe ee ardayda Harrison Park.
- **Xaafada Vestal K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Harrison Park.** Tani waxay gacan ka geysan doontaa abuurista diiwaangelinta buuxda ee Harrison Park waxaanay boosas ka baneyn doontaa Roseway Heights MS iyo u beddelisteeda mustaqbalka ee dugsiyada K-8 ee gobolka.
- **Xaafada Woodstock K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Lane.** Tani waa si kor loogu qaado diiwaangelinta Lane.
- **Xaafada Creston K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Hosford.** Tani waa si loo xaddido buux dhaafinta Kellogg iyo in laga caawiyo dhimista lumitaanka xaafadda Woodstock ee Hosford.



Jaantuska qaabka u gudbinta ee Qabyo-qoraalka Soo jeedinta F3. Linkiga jaantuska sida fiican u muuqda ayaa kor ku lifaaqan.

Wax-ka-badelidda Beddelka Soohdimaha ee La tixgelinayo

Iyada oo laga jawaabayo warcelinta laga helay shirarkii Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari ee toddobaadkii Febraayo 7, 2022, isbeddellada soo socda ee soohdimaha dugsiga hoose ayaa la soo jeediyay si wax looga beddelo Qabyo-qoraalka Soo jeedinta F3 ee asalka ah.

Wax-ka-beddelka beddelada la soo jeediyay ee soohdimaha Woodstock iyo Lewis

Aagga imaanshaha Lewis ES ee u dhexeeya Woodstock Blvd, Carlton St, 41st Ave, iyo 52nd Ave ayaa la soo jeediyay in loo beddelo Woodstock ES. Isbeddelkan waxa dib loogu celiyay Lewis ES.

Wax-ka-beddelka beddellada la soo jeediyay ee soohdimaha Arleta iyo Marysville

Waxaa jiray isbeddelo badan oo lagu sameeyay soohdimaha Arleta ES iyo Marysville ES si loo gaaro jihaynta aagga imaanshaha waqooyi/koonfur ee labada dugsi, si la mid ah soohdimaha hadda. Kala qeybinta aasaasiga ah ee u dhaxaysa dugsiyadu hadda waa 72nd Ave.

Ilaha Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta F3 ee Wax Laga Beddelay

- [Khariiradda Guud](#)
- [Khariiradda beddelka soohdinta dugsiga hoose](#)
- [Khariiradda beddelka soohdinta dugsiga dhexe](#)
- [Nuxurka Tirakoobka](#) (lagu daray 2/16 saacadu markay ahayd 9:30am)
- [Cabbirka Saameynta Sinaanta Jinsiga](#)